# Codso deeqda Xarumaha Waxbarashada Hore (ELF)

# ka hor Oktoobar 31, 2025

*Waaxda Ganacsiga waxay u qaybinaysaa **ilaa $55 milyan oo** loogu talagalay mashaariicda dhismayaasha kuwaas oo u adeegi doona carruurta cusub ama sii wadi doonta awoodda jirta. Waxaa laga yaabaa in barnaamijkaagu u qalmo! Deeqaha ELF hadda aad ayaa loo heli karaa iyadoo la raacayo isbeddelladan cusub ee barnaamijka:*

- *Lacagaha u dhigma loogama baahna codsadayaasha la kulmaya dhibaato dhaqaale.*
- *xaddidaadaha abaalmarinta waa la tirtiray*
- *Waxbarashada Carruurnimada Hore iyo Barnaamijka Caawinta (ECEAP) beddelka maalin qaybteed ilaa boosaska maalinta-buuxda ah ayaa loo aqoosaday ballaadhinta u qalanta*

**Yaa u qalma:** Bixiyeyaasha waxbarashada hore ee u qalma ee hadda u adeegaya ama qorsheynaya inay u adeegaan carruurta iyada oo loo marayo Working Connections Child Care (WCCC) ama Waxbarashada Carruurnimada Hore iyo Barnaamijka Caawinta (ECEAP).

**Waa maxay:** Deeq raasumaal ah oo lacag-celin-ku-salaysan oo loo sii marayo Waaxda Ganacsiga ee mashaariicda dhismaha taasoo kordhin doonta awoodda waxbarashada hore si loogu adeego carruur badan ama mashaariicda dhismaha kuwaas oo ilaalin doona awoodda hadda jirta. Ogsoonow in habka loo codsado deeqaha ballaarinta iyo deeqaha dayactirka ay ku jiraan hal codsi , oo hoos ku xiran. Haddii aad rabto inaad codsato maalgelin mashaariic badan, waxaad u baahan tahay inaad u codsato mashruuc kasta si gaar ah.



**Halkee:** Ka codso online iyada oo loo marayo Zoom Grants

**Goorma (qiyaasta waqtiga):**
- Oktoobar 31, 2025 saacadu markay tahay 5:00 galabnimo wakhtiga kama dambaysta ah ee arjiga
- Noofambar ilaa Diseembar 2025 Codsiga dib u eegista iyo dhibcaha
- Janaayo 2026 codsadayaasha la abaalmariyay ayaa la doortay
- Febraayo ilaa Maarso 2026 Abaalmarinta ayaa lagu dhawaaqay

## Kaalmada Codsiga waxaa laga heli karaa Imagine Institute

## Kooxda Imagine Institute ee Kaaliyeyaasha Farsamo waxa la heli karaa Isniinta-Jimcaha 8 subaxnimo ilaa 6 galabnimo iyado la wacayo 206-492-5249

Imagine Institute ayaa ku siinaysa taageerada soo socota codsadayaasha luqadda ay doorbidayan:

- Fahamka shuruudaha deeqda iyo u-qalmitaanka
- taageerada codsiyada oo qof qof ah
- Kaalmada ururinta agabka
- Dib u eegista iyo bixinta jawaab celinta qoraallada deeqda
- Bixinta hagitaan si ay uga caawiyaan bixiyeyaasha inay fahmaan oo ay la jaan qaadaan yoolalka mashruuca
- Wadaagista tusaalooyin si ay u muujiso isku waafaqid xooggan, ee aan la nuqulin